


Kitaabka Quduuska ah ee loogu talo galay Carruurta Soo-jeedinayaa



Ninkii Dabka



Waxa qoray: Edward Hughes

Waxa Tusaaleeyay: Lazarus
Alastair Paterson

Waxa dhaqan-geliyay: E. Frischbutter


Waxa tarjumay: Zemendale Translation Service
email: zemendale@gmail.com
Po Box 32155, Addis Ababa, Ethiopia

Waxa soo saaray: Bible for Children
www.M1914.org

©2025 Bible for Children, Inc.

Liisan: Waxaad xaq u leedahay inaad koobiyaaso ama daabacato
qisadan, in alla inta aanad ka iibinaynin.

Wax walba waxay u ekaayeen wax xun xagga
Israa'iil. Boqorka iyo boqoraddaba Ilaah bay
nebcaayeen. Tusaale mid xun weeye! Isla kolkaa
dadkii weliba Ilaaj bay nabcaadeen oo waxay
caabudeen ilaahyo been ah. Ma jiraa mid Ilaah jecel?



Haa, waxaa
jiray
inyar oo
caabudayaal
daacad ah.
Maalinbaa,
Ilaah la
hadlay
mid iyaga

Eliiyah wuxuu u sheegay boqorkii sharlowga haa ee Axaab, "Waxaan Rabbiga ah Ilaaha reer Binu Israa'iil ee aan hortiiisa taaganahaya noloshiisa ugu dhaartay inaan dharab iyo roob midna sanadahan la arki doonayn, sidaan leeyahay mooyaane." Tan micnaheedu waxaa weeyaan Abaar! Ilaah ma uusan u ogalaanin karayn in dadkiisa reer binu Israa'iil

ku sii socdaan sharka.

3




Ka dib markii loo digay boqorkii,

Ilaah Eliiyah wuxuu u diray meel cidla ah oo wadanka ahayd. Meeshasi, oo tog - durdur

biyo leh, Eliiyah meeshaa buu ku sugayey. Ilaah wuxuu u soo diray tukayaal quudiya isaga. Waxayna u keeneen kibis iyo hilib, subaxdii iyo fiidkiiba. Oo Eliiyah wuxuu ka cabi jiray durdurkii biyaha ahaa.


4

Kolkiiba wuu engagay durdurkii, sababta oo ah waxaa arlada ka jirin roob. Ereyga Rabbiga ayaa run noqday. Dalkoo idilna biyo la'aan baa ka dhacday. Mirihii beerahana way bix waayeen. Dadkiina wuu gaa-jooday. Lagayaabe, Eliiyah inuu la yaabay waxa ku dhici doona isaga maadama aysan jirin biyo uu cabo.




5

Ilaah baa la hadlay Eliiyah, "Kac, oo waxaad tagtaa Sarefta, halkaasna iska deg. Oo bal eeg, waxaan amray naag carmal ah oo adiga ku quudin doonto." Ilaah wuu garanayay baahida adeegihiisa. Laakiin maxay tahay sida acajiibka ah ee uu u wax u siiyey.



6

Si ishooseeysin ah ayuu Eliiyah u adeecay Ilaah. Markii uu yimid Sarefta, naagtii carmalka ahayd waxay joogtay magaalda iriddeeda oo xaabo ayay guranaysay.



7

"Waan ku baryayaaye, waxoogaa biyo ah weel iigu keen aan cabbee." Ayuu naagtii weyddiistay Eliiyah. "Waan ku baryayaaye waxaad gacanta iigu soo qaaddaa in yar oo kibis ah."

Carmashii waxay ugu jawaabtay. "Waxaan heystaa sacab muggiis oo jidhiidh ah iyo in yar oo saliid ah oo kusad ku jirta."




8

Waxaa ka sii darnayd,
naagtii markii ay
nabiga ku tidhi markii
ay intan idlaato, iyada
iyo wiilkeedaba la
dhiiman doonaan gaajo.



9

"Ha cabsan. Ii samee marka hore in yar oo kibis ah, oo dabadeedna u samee adiga iyo wiilkaaga," Eliiyaah baa sidaa ku yidhi. "Weelka jidhiidha ahu idlaan mayo, kusada saliidda ahna idin gabi mayso ilaa maalinta Rabiga dhulka roob ku soo daayo." Iklaah wuu karaa hawshaa mucjisada ah inay sidaa u dhacdo. Oo wuu sameyey! Naagtii iyo wiilkeedii maalmo badan bay wax cunayeen, welkii jadhiidha ahaana ma idlaan, oo kusadii saliidda ahaydna ma aysan engag gabin.



10


Eliiyaah maalmo badan buuna la noolaa iyaga. Maalin baa wax laga xumaado dhaceen. Wiilkii carmasha ayaa dhintay. Eliiyaah baa maydkii wiilka qolada qolka xagga sare u qaaday.



Markaasuu Rabbiga u qayshaday, isagoo leh, "Rabbiyow, Ilaahayow, Waan ku baryayaaye, wiilkan naftiisa mar kale ha ku soo noqoto." Ma tahay baryo aan suurtagal ahayn!

11

Rabbiga wuxuu dhageystay codkii Eliiyaah iyo nafsayadii caruurtii u soo noqtay Isaga. Wuuna aqbalay. Markii Eliiyaah ilmihii intuu soo qaaday ayuu u dhiibay hooyadii waxayna tidhi, "Haatan waan garanyaa inaad tahay nin Ilaah, iyo inuu run yahay erayga Ilaah."



12


Saddex sanadood ka dib, Ilaah wuxuu u diray Eliiyaah inuu ku noqdo boqorkii, Isagoo leh, "Roob baan u soo diri doonaa dhulka." U tag Axaab! Naagtiisii Yesebeel kol horeba waxay dishay ilaa afar boqol oo



nebiyadii Ilaah ahaa. Laakiinse Eliiyaah lama murmin. Wuxuu aaday Boqor Axaab.

13

Markii ay labadan nin kulmeen, Eliiyaah wuxuu ku xidhay Axaab shuruud ah inuu isukeeno reer binu Israa'iil iyo 850 kii nebiyadii beenbeenta ahaa. Meeshaasina waxay ahayd buurtii Karmal.




14

Eliiyaah labadii dibi buu soo diyaarshay in allabariga bixintiisa loo isticmaalo. Laakiin ma aysan jirin dab baxaya oo la isticmaalo. "Idinku u yeedha magaca ilaahiina, anna waxaan u yeedhanayaa magaca Rabbiga," ayuu yidhi. "Oo Ilaah baa dab ku soo jawaabaa, ha ahaato." "Kaasu waa hadal wanaagsan," bay dadkii bay dadkii ku jawaabeen.




15

Intii ka soo bilaabata aroortii ilaa galabtii nebiyadii beenbeenta ahaa waxay u yeedhanayeen ilaahyadooda. Iyagoo boodboday oo cayaaraya oo mindiyo isku jarjaraya ilamaa dhiig ka soo burqado. Wax dab ah na ma jirin.



16



Dabadeed Eliiyaah baa soo urursaday xaabadiisii oo biyo ku qoyan. "Rabbiyow i maqal, oo I maqal, inay dadkanu ogaadaan inaad Adigu Ilaah tahay Rabbiyow...." Oo markaasaa dadkii soo dhacay. Oo waxaa wada gubtay allabariga la gubo, dibigii, iyo qoryihii iyo dhagxantii meeshii qurbaanka!

17

Markii dadkii taas arkay ayay ku qayliyeen, "Rabbigu, Isaga waa Ilaah." Oo Eliiyaah wuxuu yidhi "Nebiyada Bacal qabta oo midna yuusan ka baxsan!" Eliiyaah wuxuu sameeyey wixii hadda ka hor uu boqor Axaab sameeyey oo kale. Wuu wada laayay gabi


haan nebiyadii beenbeenta ahaa.



18

Deedna adeegihii Ilaah wuxuu u sheegay Axaab inuu iminka roobku soo socdo oo uu da'i doono. Durbadiiba waxaa soo muuqday daruur yar. Ma roob baa? Ka dib in ka baadan saddex sanadood

oo geeri badan jirtay abaarta darteed!



19

In yar ka dib cirkii baa soo madoobaaday, daruur dabayl wadatan wey soo curatay, oo roob mahigaan ah baa da'ay. Ilaah baa keenay nimcada roobka. Ilaah dadkiina wuxuu tusay inuu Eliiyaah waxa uu iyaga u sheegay inay run ahayd. Ilaah wuxuu tusay in Isaga keliya yahay Ilaaha runta ah.




20



Maxaad u malaynaysaa inuu boqor Axaab sharfo Ilaah iyo adeegihiisa Eliiyaah? Maya! Sida runta ah, Yesebeel waxay isku dayday inay disho Eliiyaah, laakiinse wuu ka hor baxay. Ugu dambayntii, Axaab wuxuu ku dhintay dagaal oo addoomadii baa Yesebeel saaray gidaar sare meel ah. Waxayna ku burburtay dhimashadeedii dhagax weyn hoostii.

21



Maxaa ku dhacay Eliiyaah? Maalin baa waxaa loo soo diray gaadhifardoodka dabka ee fardaha; oo Eliiyaah, Ninkii Ilaah ee dabka ahaa, waxaa lagu qaaday dabbayl cirwareen samada.

22

Ninkii Dabka


Qiso ka ahaatay Ereyga Ilaah,
Kitaabka Quduuska ah,

waxa laga helayaa

Boqorada Koowaad 17-19, Boqorada Labaad 2

"Erayadaada furniinkoodu wax buu iftiimiya." Sabuurka 119:130

23



24

60 24

Qisadan ku xusan Kitaabka Quduuska ahi waxay inoo sheegaysaa wax ku saabsan Ilaaheenna cajiibka ah ee ina sameeyay isla markaasna kaa raba inaad isaga ogaato.

Ilaah wuxuu ogsoonyahay inaan samaynay waxyaalo xunxun, kuwaas oo uu Ilaah ku magacaabo denmbi. Cigaabka denbiguna waxa weeyi dhimasho, laakiinse Ilaah aad ayuu kuu jecelyahay waxaanu kuusoo diray Wiilkiisa madiga ah oo ah Ciise, si uu ugu dhinto iskutallaabta korkeeda una maro cigaabka denbigaaga. Kaddib Ciise dib ayuu usoo noolaaday isagoo aaday Samada! Haddii aad Ciise rumaysantahay oo aad weydiisato inuu kaa cafiyo denbiyadaada, waa uu kaa dhaafi doonaa! Waa uu iman doonaa isagoo adiga kugu dhex noolaan doona, oo adiguna isaga ayaad weligaa la noolaan doontaa.

Haddii aad rumaysantahay in middani ay run tahay, sidan ku dheh Ilaah: Qaaligaygii Ciisow, waxaan rumaysantahay inaad tahay Ilaah, iyo inaad noqotay aadane si aad ugu dhimato denbiyadayda, oo imikana dib ayaad u noolaatay. Fadlan noloshayda soo gal oo cafi denbiyadayda, si aan markaas imika u helo nolol cusub, oo maalin maalmaha ka mid ahna aan adiga kuula jiro abid. Igu caawi inaan ku addeeco oo aan u noolaado sidii anigoo ah ilmahaaga. Aamiin.

Akhri Kitaabka Quduuska ah oo maalin walba la hadal Ilaah!
Yooxanaa 3:16

25